

MUJINTA AQOONTA XIRFADEED

HAGISTA KU SAABSAN QIIMEYNTA OO LOGU TALAGGALAY ARDAYGA

FIIRO GAAR AH

<p>1.</p> <p>Waxaad barataa ama u kuurgashaa shuruudaha la iska doonaayo ee xirfadda, ahdaafta iyo waxyaabaha lagu qiimeynaayo qaybaha shahaadada.</p>	<p>2.</p> <p>Ka taxaddar inaad taqaanno dhammaan waxyaabaha aad doonayso inaad ku soo bandhigto imtixaanka shahaadada.</p>	<p>3.</p> <p>Waxaad adiga iyo macallinka si wadajir ah u cusboonaysiisaan, qorshaha horumarinta aqoonta shakhsiahaaneed ee loo yaqaan (HOKS) ee qorshihii bilowga imtixaanka shahaadada iyo hadafkaaga ah inaad ka guul gaarto.</p>	<p>4.</p> <p>Waxaad caddaysataa nooca shaqooyinka ee aad aqoontaada ku muujin karto.</p>
---	---	--	---

MUJINTA AQOONEED IYO QORSHEYNTA IMTIXAANKA SHAHAADADA



Waxaad barataa ama u kuurgashaa shuruudaha la iska doonaayo ee xirfadda, ahdaafta iyo waxyaabaha lagu qiimeynaayo qaybaha shahaadada. Iska hubi, in aad fahamtay arrimahaas.

WAA HAGAAG



Cusboonaysii qorshaha horumarinta aqoonta shakhsiahaaneed ee loo yaqaan (HOKS), ee qorshihii bilowga imtixaanka shahaadada iyo hadafkaaga ah inaad ka guul gaarto.

WAA HAGAAG



Waxaad adiga, macallinka iyo hagaha goobta shaqada aad si wadajir ah u qorashaysaan xilliga imtixaannada shahaadada, qaabka aad u muujinayso aqoontaada, sida loo qiimaynaayo aqoontaada iyo cidda qiimeynaysa.

WAA HAGAAG

Kala hadal hagahaaga goobta shaqada iyo macallinkaaga, shaqooyinka aad ku muujin karto aqoontaada

WAA HAGAAG

Ka codso hagahaaga goobta shaqada iyo shaqaalaha kaleba, aragticelinta ku saabsan sida aad howsha u qabatay.

WAA HAGAAG



Iska hubi inaad baratay aqoontii xirfadeed ee hadafkaagu ahaa, islamarkaana aad diyaar u tahay imtixaanka shahaadada.

WAA HAGAAG

Waxaad ka heleysaa macallinkaaga macluumaadka aad u baahan tahay ee ku saabsan, sida aad u cusboonaysiin karto imtixaanka shahaadada, iyo sidii aad dhibcaha maaddooyinka kor ugu qaadi lahayd

WAA HAGAAG

Waxaad qiimeyayaasha ka heleysaa go'aankii qiimeynta iyo wixii ay ku saleeyeen go'aankaas. Waxaad xaq u leedahay inaad ogaato, qaabka waxyaabaha lagu saleeyay qiimeynta loo waafajiyay ama loogu dabbaqay qiimeynta aqoontaada.

WAA HAGAAG

Waxaad qiimeysaa sidii aad u gudatay imtixaanka:

Sidee ayaad u guulaysatay, iyo inaad gaartay hadafakaagii marka loo eego arrimihii qiimeynta iyo inkale.



Si kastaba is qiimeynta uu qofku sameeyo wax saamayn ah kuma lahan go'aanka qiimeynta.

WAA HAGAAG

Ku muuji aqoontaada sida ay tahay howsha lagu heshiyay in la sameeyo, iyadoo aad ku qabanayso qaabkii lagu heshiyay in loo sameeyo.

Waxaad u diyaargarowdaa in aad qiimeyayaasha u sababayso hawsha aad qabatay iyo waxyaabaha aad dooratay ee hawshaas la xiriira.

WAA HAGAAG



HUBINTA IYO SIXITAANKA QIIMEYNATA

Haddii aad doonayso in qiimeynta la hubiyo, waxaad ka codsan kartaa qiimeeyayaasha, adigoo qaab qoraal ah ugu soo gudbinaaya muddo 14 maalmood gudahood ah, taasoo ka soo bilaabanaysa maalinka aad heshay wargelinta ku saabsan natiijada qiimeynta.

Haddii aad doonayso inaad codsato in la saxo go'aanka hubinta, waa inaad codsigaagaas ku samaysaa muddo 14 maalmood gudahood ah, taasoo ka soo bilaabanaysa maalinka aad heshay wargelinta ku saabsan hubinta qiimeynta.

Macallinkaaga ka codso tilmaanbi-xinaha ama hagista ugu muhiimsan ee ku saabsan, sida gudiga nolosha shaqada looga codsado sixitaanka qoraal ahaanta ah.

Haddii gudiga nolosha shaqada ay ogaadaan in khalad la galay markii qiimeynta la samaynaayay, waxaa ay amri karaan in la sameeyo qiimeyn cusub, iyo sidoo kale qiimeeyayaal cusub, iyadoo xusaaya sababaha arrinkaas lagu saleeyay.



FIIRO GAAR AH

Hagista qiimeynta ee aqoon muujinta ee loogu talaggalay ardayga, goobta shaqada iyo macallinka, waa kuwo taageeraaya qorshaynta qiimeynta muujinta aqoonta iyo qiimeynta muujinta aqoonta ee waafaqsan arrimaha lagu saleeyay qiimeynta imtixaanka shahaadada. Nuxurka iyo muuqaalka faylasha macluumaadka ee lagu diyaariyay mashruuca internetka ee aqoon muujinta wanaagsan, waxba lagama beddeli karo, waxna lagama saari karo, si kastaba astaanta iyo meelaha lagala soo xiriiri karo ururkaaga gaarka ah waa lagu dari karaa macluumaadka haddii arrinkaas loo baahdo.

